

MUSTAQBALKAAGA WAA WADO FURAN!

Dalabka ardayda xirfadleyda ah waa uu badan yahay ee ay ku dalbanayaan horumarka ku saabsan xirfadaha dayactirka gaadiidka. Ka shaqeynta magaalo, degmo, wakaalad qabiil, ama waaxda gaadiidka magaalada waxa lagu helaa fursado waawayn!

- Hel nolal wanaagsan oo leh dheefo waawayn
- Hel xirfado muddo dheer
- Codso teknoolajiyadii iyo farsamooyinkii ugu dambeeyay
- Gal tababar socda
- Aqoonsi ka dhex hel asxaabtaada iyo bulshadaada.

Gaadiidka guud ahaanba waa isku xirka dadka iyo fursadaha. Xirfadleyda ka Dhex shaqeysa Dadwaynaha ayaa masuul ka ah hubinta in dadku awoodaan inay si badqab iyo kalsooni leh u aadaan meelaha ay rabaan. Si ay sidaas u sameeyaan, xirfadleyaashaan waxay dib-u-eegaan oo adeegsadaan teknoolajiyadaha iyo hal-abuurada ugu casrisan ee shaqadooda. Waxayna ka sii baaraan-degaan mustaqbalka si ay u diyaariyaan waxyaabaha imaan doona - sida u adeegsiga diyaaradaha aysan cidna wadin kormeerka badqabka iyo ku qorsheynta mustaqbalka baabuurta iyo taraagyada is-wada.

Booqo **MNTransportationCareers.com** si aad u hesho xogo sida muuqaalo, shaqooyin lasoo dhejiyay, borofaylo, fursadaha tababarka, daraasado shaqo iyo xogo/ilo kale oo loogu talagalay si wax looga barto sida loo qaabeeyo xirfada dayactirka gaadiidka.

KU XIRNOOW



Mareegta

mntransportationcareers.com



Iskaan ku samee si aad
u hesho xog dheeraad
ah




MINNESOTA LTAP
UNIVERSITY OF MINNESOTA

SHAQOYINKA GAADIIDKA DEEGAANKA EE MINNESOTA



Ee loogu
talagalay Ardayda

Waxaan ka shaqeeyay
waaxo shaqo oo
kalduwan: taraafikada,
wadooyinka, baakinada,
waxbarashada
injineernimada,
badelida layrarka...
Xog la xariirta xirfada,
haddii aad joogteyso
indho indheynta
aadna awooda saarto
waxyaabaha ku xiiso
geliya, waxaa kuu
furmaaya albaabo.”

Jacob Remmington, Shaqaale Dayactira
Wadooyinka, City of Hopkins

“Gaar waxa aad hiigsaneyso.

La jaanqaad

kooxda dayactirka

Agaadiidkeena.”

XIDHMO XOG OO DHAMEYSTIRAN

Faa’idooyinka macquulka ah ee laga helo qaar badan oo kamid ah hay’ada deegaanka— daryeelka caafimaadka, qorshooyinka caymiska hawlgabka, fasaxa iyo waqtiyada mushaarka lagu helo, barnaamijyada badqabka iyo tababarka— waxay noqon karaan kuwo u qalma oo leh faa’idooyin dahab ah waxayna meesha ka saari karaan mushaarka saacadaha badan ee shirkadaha gaarka loo leeyahay qaarkood bixiyaan. Waxaad helayaa waqti aad la qaadato saaxiibadaa iyo qoyskaaga si aad u wada sameysaan waxyaabo aad ku raaxeysataan waqtiga aad fasaxa tahay. Waxaad qorsheynaysaa mustaqbalkaaga adoo ku nool nolal buuxda sidoo kalena ka shaqeynaaya shaqada habboon maanta!



Dheefaha

Boosaska shaqooyinka shirkadaha dadwaynaha waxay bixiyaan mishaar fiican iyo dheefo badan oo qiimo leh si ay kaaga caawiyaan inaad raaxeysato maanta aadna isku diyaariso mustaqbalka.



Jadwalada

Jadwalada shaqada waa kuwo si fiican loo qiyaasi karo oo caadi ah marka lala barbardhigo kuwa boosaska shaqooyinka shirkada gaarka loo leeyahay oo badan.



Dheelitirka Shaqada/ Nolasha

Boosaska gaadiidka hay’ada deegaanka waxay u dhaw yihiin guriga waxayna u adeegaan bulshada.

U XIRFAD BARASHADA GUUSHAADA

Xirfada dayactirka gaadiidka inta badan waxay shaqadoodu bilaabataa xagaaga, shaqo tababar ah, ama barnaamij tababar- ayadoo la haysto ama aan la haysan shahaado dugsi sare ama GED. Waxaa jira barnaamijyo badan oo la heli karo si ay u bixiyaan tababar iyo waxbarasho inta aad shaqeyneyso. Arrintaan waxay kuu fududeyneysaa inaad iskudaydo waxyaabo kaladuwan iyo inaad hesho xirfado iyo takhasus kaladuwan adoo helaaya mushaar. Eeg [MNTransportationCareers.com](https://www.mntransportationcareers.com) si aad u hesho hagaha tababarka ee barnaamijyadaan iyo daraasada shaqada ee laga sameeyay guud ahaan gobalka.

“Mustaqbalkaagu waa
waddo furan!”